isagu maalina muu oran: Rabiyow iga dhaaf dambigayga maalinta qiyaame

Caa'isha raali Allaha ka noqdee waxaa laga wariyey inay tiri: Waxaan iri: Rasuulkii Ilaahayow Ibnu Judcaan waqtigii jaahiliga qaraabadiisa wuu xiriirin jiray, miskiinkana wuu quudin jiray, arinkaasi ma anfacayaa? wuxuu yiri: ma anfacayo, isagu maalina muu oran: Rabiyow iga dhaaf dambigayga maalinta qiyaame.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Cabdillaahi Binu Judcaan, oo ahaa Islaamka ka hor madaxdii qurayshta Ficiladiisii wanaagsanaa waxaa ka mid ahaa: xiriirintii qaraabadiisa, quudinta masaakiinta iyo wax yaabo kale oo islaamku ku booriyey dadka, wanaagaa uu qaban jiray ninkaa Aakhiradiisa waxba u tarimayso, sababtuna waa inuu Ilaahay ku kufriyey, oo uusan maalina oran Rabiyow ii dhaaf gafkayga maalinta qiyaamaha.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/65009